

Calgary



Vehicle for Hire



QODOBKA #003

ISBEDELKA DEGDEGGA AH - Hubinta Liisanka Darawalnimada Tagaasida 2024 Oktoobar 1

Vehicle for Hire Waxay jeclaan lahayd in ay ku ogeysiiso isbeddel muhiim ah oo soo socda oo ku iman doona habka looga helo booliiska xogta lagu hubinayo codsiyada Liisanka Darawalnimada Tagsiga ee cusub iyo codsiyada cusboonaysiinta Liisanka Darawalnimada Tagsiga.

Wakhti xaadirkan, nidaamkayaga gudaha waxaa lagu dhex daray Adeegga Booliiska Calgary si loo fududeeyo hubinaha booliiska. Si kastaba ha ahaatee, Calgary Police Service ayaa ku taliyay, **in laga bilaabo Janaayo 1, 2025**, ay joojin doonaan wada shaqaynta noocan ah. Sidaas darteed, **dhammaan dareewalada tagsiyada** ee codsabayaasha ah waxaa looga baahan doonaa inay **si toos ah uga helaan hubinahooda adeegga booliiska ee magaalada ay deggan yihiin** oo ay u gudbiyaan natiijada xafiiska Vehicle for Hire taasoo qayb ka ah codsigooda cusub ama dib ucusboonaysiinta.

Si loogu diyaar garoobo kala-guurkan, waxaan adeegsan doonaa hab isku-dhafaan illaa Janaayo 1, 2025. Inta lagu jiro wakhtigan, waxaanu sii wadi doonaa inaanu samayno hubinaha booliska iyada oo loo marayo nidaamkayaga hadda, laakiin codsabayaashu waxay sidoo kale haystaan ikhtiyaarka ah inay usoo gudbiyaan hubinta booliska oo sax ah xafiiskaygaha hore. Laga bilaabo Janaayo 1, 2025, dhammaan darawalada doonaya inay codsadaan ama cusboonaysiiyaan liisanka darawalnimada Tagaasida waa inay keenaan hubintooda booliiska xafiiska Vehicle for Hire ay usoo gudbiyaan. Hubinta booliisku waa inay ku taariikhaysnaataa 60 maalmood laga bilaabo taariikhda codsiga.

Faa'iidada isbeddelkan – hadda shakhsiyaadka codsanaya Liisanka Darawalnimada Tagsiga iyo Liisanka Wadayaasha Gaadiidka labadaba waa inay helaan laba hubin oo booliis oo kala duwan. Habka cusub, hal hubinta booliiska ah ayaa loo aqbali doonaa labada codsi, si wakhtiga loogu ilaaliyo codsadaha loona dhimo kharashyada.

Si aad u codsato hubinaha Booliska Calgary, fadlan raac link-gan: [calgarypolicechecks](https://calgarypolicechecks.ca)

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, fadlan iimayl u dir vfhlicensing@calgary.ca.

Mahadsanid,

Cory Porter

Ku Xigeenka Guddoomiyaha, Vehicle for Hire
Heerarka Gaadiidka Dadweynaha

